



Hel aragti guud adigoo caawimo ka helayo HelsaMi



Iskaangaree calaamadda QR  
ama war siyaado ah ka aqriso [www.helsami.no](http://www.helsami.no).  
HelsaMi aab ahaan bay mobilka ugu jirtaa.



## War kooban oo lagaa siiyo waxa HelsaMI ay tahay:

### Waa maxay HelsaMI?

- Adoo adeegsanaya aab ama bogga internetka waxaad ogaan kartaa macluumaadka caafimaadkaaga waxaadna la xiriiri kartaa shaqaalaha caafimaadka - si fudud oo sugan.

### Yaa isticmaali kara HelsaMI?

- Qofka 16 sano ka weyn ee gargaar caafimaad ama adeeg daryeel uga baahan isbitaalada, degmooyinka iyo dhakhtarada isticmaala HelsaMI.
- Waxaad kaloo u geli kartaa xubnaha kale ee qoyska.

### Macluumaadkaygu amaan ma ku yahay HelsaMI?

- Haa. Waxaad ku gelayaa furaha ID-porten (metelan BankID-ga mobilka) sida adeegyada kalee dawladda.

HelsaMI waxay ku qorantahay af norwiji iyo af ingiriisi.



### Maxaan u adeegsan karaa HelsaMI?

- Ogaalka ballamaha
- Aqrido faylkaaga iyo natiijada tijaabooyinka
- Waraaqo iyo farriimo
- Kulamo fiidiyow ah
- Iyo waxyaalo badan....

### Maxaan ka helayaa HelsaMI oo aanan ka helayn Helsenorge?

- HelsaMI waxaad ka aqriyi kartaa warka faylkaaga caafimaad, metelan warka la qoro kulamada ka dib, isbitaal dhigista iyo waxyaalo badan.
- Waad la xiriiri kartaa si aad ula hadashid kuwo badan oo ah shaqaalaha caafimaad ee ku qaabilsan.

### Ma qasabaa inaan isticmaalo HelsaMI?

- May, waa ikhtiyaari. Sidii hore ayaad u adeegsan kartaa taleefan iyo waraaqo.

[www.helsami.no](http://www.helsami.no)